Codsi Cambaareen falkii shirqoolka,fuleynimada,waxashnimada ahaa ee lagu soo weeraray kulankii aasaasida Golaha Nabada iyo Horumarinta Deegaanka Somalida Ethiopia e eka dhacay 16 Augoust,2009 magaal madaxda Sweden ee Stockholm,kaasoo lagu qabtay Hotelka Ibis ee Spånga hoolkiisa shirarka.

Shirkaas oo si habsami ah ku bilowdy kuna socday bilow ilaa dhamaad ayaa waxaa goobjoog ka aha xubnihii aasaasayaasha, iyadoo lagu soo casuumey xubno ka socda dhowr ururr ,shaqsiyaad gaar ah oo fara badan,kuwaas oo dhamaantood ku caan baxay xal u raadinta dhibaatada ka taagan dhulkooda hooyo,jecelna marwalba sidii nabad loogu soo dabooli lahaa xaalada cakiran ee deegaanka Somalidu degto ee Ethiopia.

Shirkaas oo aan khuseenin dhamaanba qeybaha kala duwan ee maamulka deegaanka Somalida Ethiopia iyo qolyaha mucaaradkaba, balse u ergoonayay in shacabka loo turo,

hadba qoladay khusaysana lagala xaajoodo.

Waxaa aad usoo dhaweeyey naguna dhaliyey mawqifkeena shacab fara badan oo qurbo joog ah iyo kuwa gudahaba, isuguna jira odoyaasha deegaanka,aqoonyahanka,iyo waxgaradka iyo culumada iyo weliba dhalinyaro fara badan oo ka soo jeeda deegaankaas.

Waxaan sanadihii ugu dambeeyeyba culeys weyn saarnay sidaan u hirgelin lahayn baahida shacabka deegaanka isla markaasna nabad iyo isfaham looga dhalin lahaa dhexdooda.

8 bilood ka hor waxaa noo suurto gashay inaan bilowno qaabayntii iyo dhismihii Golahan.Waxaan usoo bandhignay dowlada Ehtiopia iyo maamulka deganka Somalida labadaba waxay aad ugu riyaaqeen soona dhaweeyeen fikirkaas,sidoo kale waxaa soo dhaweeyey qeybaha kala duwan ee mucaaradka ONLF horeyna u cadeeyey in ayagu aysan xujo iyo carqabad ku noqonayn wixii nabad raadin ah ee arimahaas iyo deegaankaas khuseeya.

16 August baa waxay ahayd maalintii aan ku dhawaaqnay Golaha Nabada iyo Horumarinta Deegaanka Somalida Ethiopia.

Waxaa weerar waxashnimo ah oo akhmaqnimo leh lagu soo qaaday qaar ka mid ah aasaasayaashii Golaha Nabada iyo Horumarinta Deegaanka Somalida Ethiopia wakhtigaas oo keligood ay ku sugnaayeen banaanka hotelka(parking-ka baabuurta) iyagoo isu diyaarinayay inay ka raacaan baaburkay wateen oo goobtaas keligiis ku hadhsanaa.

Waxaa weerarkaas soo qaaday qaar ka mid ah taageerayaasha lagu yaqaano ururka ONLF oo uu hogaaminayay masuul sare oo lawada yaqaano lana yiraahdo Abdi Abdullahi Hussein(Gamaadiid) isagoo si gaadmo ah kusoo hogaamiyey 6 gaari oo dhalinyaro ka buuxaan .

Salaan iyo isgarasho ka dib wuxuu Gamaadiid toos gacantiisa ugu weeraray Masuul ka mid ah aasaasayaashii Golaha ahna masuuliyiinta sarsare oo Golaha lana yiraahdo Mohamed Mursal Kabare. Kadibna waxaa gacanta wada saaray dhamaan dadkii uu watay Gamaadiid oo midba meeshuu la heli karay iyo wuxuu la heli karay ku dhuftay Mohamed Mursal Kabare, ilaa uu miyir beelayna ku waday,hadana uu weli u yaalo dhakhtarka weyn ee Stockholm ku yaala loona yaqaano Karolinska dhaawacyadii halista geliyey naftiisa welina caafimaadkiisa uu kasoo kaban la’ yahay.

Mohamed Mursal Kabare oo ku caan baxay inuu ka shaqeeyo wanaaga, caqligiisa badana u isticmaali jirey dhinaca fiican mar walba,ahna masuul kasoo shaqeeyey soona qabtay xilal dowli ah iyo kuwo hayadeed iyo weliba kuwo gaar ahba, baa waxaa fajac iyo amakaag gelisay umad farabadan oo aqoon u lehayd isna weydiinaya weli sababta una baahan jawaab.

Sidaa awgeed waxaan cambaarayn aad ah dusha kaga tuuraynaa una soo jeedinaynaa dhamaan intii falkaas fuleynimada, waxashnimada iyo akhmaqnimada leh ee loogu gaystay Mohamed Mursal Kabare,gaar ahaana guruubkii taageerayaasha ONLF ta ahaa ee uu hogaaminayay masuulkii ONLF ee Abdi Abdullahi Hussein(Gamaadiid).

Haddaba,waxaan dhamaan waxgaradka,odoyaasha,shacabka iyo jaaliyadaha arintan ay khuseeyso iyo weliba dhamaan mushtamaca Somaliyed meel uu joogaba ka codsanaynaa inay dhaleeceeyaan falkaas BIRMAGEDADA la isugu dayay in lagu dilo naftiisa,ahna wax ku cusub diinteena suuban iyo Dhaqankeenaba.

Sidoo kale wuxuu Goleha soo dhawaynayaa sidii nabad loogu xalin lahaa dhibkii dhacay oo aan jawaab la mid ah looga bixin loogana ficil qaadanin, laakiin ay ku haboon tahay in sharciga loo daayo,laguna taageero sidii loo horkeeni lahaa sharciga iwm.

Isku dhacyada noocan oo kale ah waxay u sahlayaan inta xumaanta iyo kala qoqobka bulshadeena jecel inuu cimrigoodu ku dheeraado oo sidaas lagu jiro.

Aduunka hadda aan ku noolnahay waa mid caqligu shaqeeyo ee uusan xoogu shaqeyn sidaa awgeed waxaan ku talinaynaa inuu caqligu shaqeeyo,umada horumarkeedana loo soo istaago.

Waxaan maalmaha soo socda idiin soo gudbin doonaa cajaladii vidioga ahayd ee laga duubay shirka ka hor intaan la soo weerarin golaha nabada iyo horumarinta deganka somalida ethiopia si aad uga qanacdaan beenta la isla meerayo .Sidoo kale waxaad booqan kartaan website-ka Golaha oo ah www.srpdf.com kaas ood uga dhergi kartaan waxaan nahay iyo ujeedadeena.

Waxaan fariin u direynaa dhamaan aqoonyahanka iyo waxgaradka deegaanka ugana codsanaynaa inaysan aamusin,cidkalena ka sugin waxtarka,wax u qabadka iyo taageerida nabada iyo horumarinta shabacabka deegaankooda.

Waxaan ka digaynaa kana codsanaynaa inay ka reebtoomaan, joojiyaana **website yada** ka hadla arimaha deegaanka, waxyaabaha hurinta colaada walaalaha wada dhashay keeni kara ee deegaanku ka wada dhexeeyo kuna bedelaan waxyaabaha danta dadka ah oo dhabta ah keenina kara horumar iyo nabad waarta.

Maamulka Sare ee GNHDSE.